

Filimka cimiladda >

Isbeddelada Nidaamyada deegaanka

Isbeddelada cimiladdu waxay saamayn doonaan nidaamyada deegaanka ee adduunka oo dhan, iyaddoo Cidhifka adduunka uu yahay meesha ay aad waxyeeladu u gaadhay. Halkan waxaynu hadda ka hor ku aragnay cawaaqib muuqda sida heer kulada badda diiran, barafka badda ee milmaya ama dhalaalaya, soo saarida noole ili maqabatay ah oo badda sabeeya iyo noocyadda dib meel ugu beeridda. Xiliga dheer waxaa inaga hor iman kara cawaaqib xun sida kuwa aanay hadda wax guud mar ah aynaan ka hayn.

Waajibaadyada la dhammaystirayo ka hor inta aan la daawan filimka

1. Waa maxay nidaamka deegaanku?
2. Bixi shan tusaale oo ku saabsan nidaamka deegaanka.
3. Noocyadee xawayaanka ah ayaa u caadi ah nidaamka deegaanka Cidhifka adduunka?
4. Maxaad u malaynaysaa in ay dhacayso marka nidaamka deegaanka cidhifka adduunka marka heer kulku sare u kaco?

Waajibaadka la xidhiidha filimka

1. Sababtee ayaa wax soo saarka muhiimka ah ee Bad waynta Cidhifka adduunka ugu kordhay sanadahii dhawaa?
2. Sidee ayay nolosha xawayaanku isku beddelaysaa Bad waynta Cidhifka adduunka?
3. Waa maxay cawaaqibka ay sababi karto bad wayntu marka uu ku bato asiidhu?
4. Hababkee ayaa xawayaanka seelka wareegyada leh ugu tiirsanyahay barafka badda?
5. Cimilo diiran waxay u keeni kartaa baraf badan ama roob Cidhifka adduunka. Tani markiiba waxay keentaa barafka oo milma ka dib ama ka hor wakhtiga gu'ga. Elisabeth Cooper Waxay fulisay tijaabo ay ku baadhayso cawaaqibka barafka ka dib milmaya. Sharax sida ay u diyaarisay tijaabada?
6. Sharax sida barafka ka dib milmayaa u saameeyo nolosha nabaadka dhirta ah iyo inta soo hadhay nidaamka deegaanka.
7. Sharaxda sida tundarahu uga qayb qaato xidhida kaarboonka, iyo sida tan u beddeli doonto haddii barafka rasaysma tundaraha muddo aad uga dheer wakhtigii hore?

Waajibaadyada la sii xoojiyay

1. Qor qoraal gaaban kaas oo sharaxaya sida asbaabaha noolaha ay isku beddeleen Cidhifka adduunka, iyo sida tan ay u saamayso asbaabaha noolaha. Xoriyad dareen aad ku samayso sawiro fudud ama hel suuradaha/sawirada taageeraya qoraalka.
2. Sababtee ayaad ugu malaynaysaa in nidaamka deegaanka cidhifyada adduunku uu aad uga nugul yahay nidaamka deegaanka ee meel kalo oo dunnida ah?